# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-1026/042012 DATE 07/04/12

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0225/042012

## Dhaqan-galka Miisaaniyad Sanadeedka 2012-ka

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan Lr. GW/KF-17/559/2012 ee ku taariikhaysan 04/04/2012 ee ay ku ansixiyeen Miisaaniyadda Sannadka 2012-ka ee Dawladda Dhexe, Dawladda Hoose, Baanka Dhexe, Dekedda Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Taakulaynta Gobollada Bari 2%, Haamaha Shidaalka Berbera, Hay'adda Wadooyinka, Warshadda Laydhka Hargeysa, Warshadda Laydhka Berbera, Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada iyo Lifaaqyada ku lamaan;

**Wuxuu Soo Saaray**

Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Miisaaniyad Sanadeedka 2012-ka ee Dawladda Dhexe, Dawladda Hoose, Baanka Dhexe, Dekedda Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Taakulaynta Gobollada Bari 2%, Haamaha Shidaalka Berbera, Hay'adda Wadooyinka, Warshada Laydhka Hargeysa, Warshada Laydhka Berbera, Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada iyo Lifaaqyada ku lamaan.

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Axmed Maxamuud Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RECEIVED
08/04/2012

Ref: GW/G/RF-13/559/2012 Date: 4/4/2012

## GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2012ka. IYO LIFAAQYADA KU LAMAAN

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobada **54aad** iyo **55aad** ee Dastuurka Qaranka. |
| MARKUU DHEGAYSTAY: | Xog-warrmka **Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda** Ku illiimiyay odoroska miisaaniyadda Dawladda ee **2012da** |
| MARKUU DHEGAYSTAY: | Xog warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi **Hoosaadka Dhaqaalaha** ee Golaha Wakiiladda. |
| MARKUU KA DOODAY: | Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadu ka koobantahay. |
| MARKUU U CODEEYAY: | Ansixinta odoroska **Miisaaniyada Dawladda** ee sanadka **2012ka** iyo lifaaqyada ku lammaan, kal- Fadhigii **17aad** fadhigisi **27aad** ee **03/04/2012** oo ay goob joog ahaayeen **57 Mudane** oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiiladda. |

## WUXUU COD AQLABIYAD AH (36 COD) OO GACANTAAG AH KU ANSIXIYAY

I. Odoroska miisaaniyada **Dawlada Dhexe,Dawlada Hoose ,Baanka Dhexe , Dekada Berbera ,Wakaaladaha Biyaha, Taakulaynta Gobolada Bari 2% , Haamaha Shidaalka Berbera, Haayada Wadooyinka ,Warshada laydhka Hargaysa ,Warshada laydhka Berbera, Madbacada Qaranka , Wasaarada Duulista Iyo Hawada** , ee 2012kaa oo qadarkeedu dhan yahay **886,496,529,998 SlSh (Sideed Boqol Iyo lix iyo sideetan Bilyan, Afar Boqol iyo lix iyo sagaashan milyan ,Shan boqol iyo Sagaal iyo labaatan kun, sagaal boqol iyo sided iyo sagaashan shilin )**

| | | |
|---|---|---|
| 2. | Miisaaniyada Maamulka Dawlada Hoose | 67,768,503,889 |
| | Miisaaniyada Baanka Dhexe | 40,188,244,903 |
| | Miisaaniyada Dekadda Berbera | 39,609,088,797 |
| | Miisaaniyada Wakaaladaha Biyaha | 37,944,566,499 |
| | Taakulaynta Gobolada Bariga 2% | 22,574,635,428 |
| | Miisaaniyada Haamaha Shidaalka Berbera | 11,206,278,000 |
| | Haayada Wadooyinka | 9,826,125,720 |
| | Miisaaniyada Warshada Isydhka ee Hargaysa | 8,455,500,000 |
| | Miisaaniyada Warshada Isydhka ee Berbera | 5,880,159,420 |
| | Miisaaniyada Madbacada Qaranka | 3,056,448,862 |
| | Wasaarada Duulista & Hawada | 1,417,740,000 |

3. **Lifaaqyada ku lamaan ee Lagu Ansixiyey Miisaniyada:-**

b. **Lifaaqa 1aad :-**Wax ka badalka tacriifadaha cashuuraha Wasaarada Hawlaha Guud, Wasaarada Ganacsiga, Wasaarada Qorshaynta, Wasaarada Maaliyada, Wasaarada Caafimaadka,Wasaarada Horumarinta Deeganka Wasaarada Xanaanada Xoolaha, Wasaarada Warfaafinta ,Wasaarada Beeraha , Wasaarada Boostaha Iyo Isgaadhsiinta ,Wasaarada Cadaalada Haayada Shaqaalaha Dawlada ee sanadka 2012

t. **Lifaaqa 2aad :-** Siyaasada Guud ee Miisaniyada

j. **Lifaaqa 3aad** Waxka badalka Miisaniyada ee Wasaarada Arimaha Gudaha ,Hayada Xuquuqul Insaanka ,Guddida baadhista Xasaaqa,Komishanka Doorashooyinka iyo Wasaarada Maaliyada

**4. Talo soo jeedinta Golaha Wakiilada ee Miisaniyada Qaranka ee 2012 :-**

1. Soo dhamaystirka shuruuda Komishanka iyo Hay'adaha aan weli Golaha La horkeenin
2. In Miisaaniyada Golaha La hor keeno Dhamaadka December ama horraanta January sanad kasta
3. In la tix galiyo Cabashada Miisaaniyada ee
   B. Waaxda Garsoorka
   t. Golayaasha Qaranka
   j. Wadada Sanaag

Ansixinta Miisaaniyada iyo Lifaaqyada ku lamaan waxaa ka aamusay (19 Mudane) waxa diiday 1(1) Mudane, Guddoomiyuhuna maa codayn sida caadada ah.

Miisaaniyadani waxay dhaqan galaysaa marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland soo saaro Digreetada dhaqangelinta.

**ALLAA MAHADLE**

Cirisaaq Siciid Aynaanle
Xog.Guud ee Golaha Wakiiladda.

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda